

Daraasada Luqadda Guriga

Qaali Waalid/Masuul:

Ujeedada Daraasada luqadda guriga (HLS) ayaa ah in lagu go'aamiyo luqadda asalka ama luqadda guriga ee ardayga. Macluumaadkan waa mid muhiim ah si ay iskuullada u siiyaan waxbarasho macno leh ardayda oo dhan. HLS waa qeyb ka mid ah nidaamka aqoonsiga ee gobolka oo dhan ee looga baahanyahay sida hoos timaada Qeybta 3113(b)(2) ee Xeerka Guuleysi Kasta ee Ardayga (ESSA) iyo 703 KAR 5:070 oo la xiriira [Ka mid noqoshada Hagitaanka Dadweynaha Gaarka ah.](#)

HLS waa in la siiyaa dhammaan ardayda ku jirta fasallada K-12aad markii ay isdiiwaangalintooda kowaad ay ka helaan degmada oo ah habraaca baaritaanka ugu horreeya ee lagu aqoonsanaayo ardayda baran karta Ingiriisiga. HLS waxaa la diiwaangaliyaa hal mar, marka ugu horreysa ee la diiwaangaliyo fasalada K-12aad waxayna ku sii jireysaa faylka isku-darka ardayga.

Fadlan ogow in jawaabaha daraasadaan hoose ay yihiin kuwa gaar u ah ardayda. **Haddii luuqad kale oo aan Ingiriiska ahayn loo diiwaangaliyo MID KA MID AH su'aalaha waajibka ah ee daraasada hoose, degmada sharci ahaan ayey waajib ugu tahay inay qiimeyn dheeri ah ku sameyso ilmahaaga si ay u go'aamiso inay u-qalmaan taageerada luqadda.**

Jawaabaha looma adeegsan doono go'aaminta xaalada sharciga ama ujeedooyinka muhaajiriinta. Haddii ilmahaaga loo aqoonsado adeegyada luqadda Ingiriiska, waad diidi kartaa qaar ama dhammaan adeegyada la siinaayo ilmahaaga.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan sida loo buuxiyo HLS, fadlan la xiriir iskuulka ilmahaaga.

Macluumaadka Ardayga (waa loo baahanyahay):

Magaca: _____ **Fasalka:** _____

Taariikhda Luqadda Ardayga (waa loo baahanyahay):

1. Waa maxay luqadda sida joogtada ah looga hadlo guriga? _____
2. Luqadee ayuu cunugaada bartay markii ugu horeysay ee uu hadalka bilaabayay? _____
3. Luqadee ayuu cunugaada bartay markii ugu horeysay ee uu hadalka bilaabayay? _____
4. Luuqaddee ayaad badanaa ilmahaaga si joogta ah ugula hadashaa? _____

Luqadda Wadaxiriirka Iskuulka (looma baahna):

5. Luuqadee ayaad jeceshahay inaad ku hesho dhammaan macluumaadka iskuulka: _____

Saxiixa Waalidka/Masuulka: _____ **Taariikhda:** _____

Markaad halkan saxiixdo, waxaad cadeyneysaa in jawaabaha afarta su'aalood oo waajibka ah ee kor ku xusan ay gaar u yihiin ardaygaaga. Waxaad fahamtay in haddii luuqad kale oo aan ahayn Ingiriis la aqoonsaday, ardaygaaga waa la tijaabin doonaa si loo go'aamiyo haddii ay u qalmaan adeegyada taageerada luqadda, si looga caawiyo inay fasiix ku noqdaan Ingiriiska. Ardayda u qalanto adeegyada taakuleynta luqadda waxay xaq u leeyihiin adeegyo ahaan bartaha af Ingiriisiga waxaana la tijaabin doonaa sanad walba si loo ogaado aqoontooda luqadda Ingiriiska sida ay u baahantahay ESSA 1111(b)(2)(G).

Loogu talagalay Adeegsiga Iskuulka Kaliya

Shaqaalaha dugsiga ee maamuley una sharaxay HLS iyo meeleynta suurtagalka ah ee ardayga ee barnaamijka horumarinta luqadda Ingiriisiga haddii lagu muujiyo luqad aan ka aheyn Ingiriiska:

Magaca: _____ **Taariikhda:** _____